**Macluumaad ku socda waalidka** *BILOWGA Kaamka xagaaga: 16 juun 2025*

---

Kaam kubada cagta oo bilaash ah 2025 oo Vävarevallen SKENE ka dhacaaya
Cinwaanka: Dalsängsgatan 4

Cida qabanqaabineysa:Skene Idrottsförening
Telefoonka xidhiidhka. 0320-408 58, kansliet@skeneif.com

**JEDWELKA - todobaadka 25, 26, 27, 28 isniin– khamiis**

**Carruurta 6–9 sanno jirka ah** *(dhalatay 2019, 2018, 2017, 2016)*
10.00-11.00 xiisada kubada cagta 1
11.00-11.30 biririf & cunto fudud
11.30-12.30 fotbollspass 2

**Carruurta 10–13 sanno jir ah** *(dhalatay 2015, 2014, 2013, 2012)*
12.30-13.30 xiisada kubada cagta 1
13.30-14.00 biririf & cunto fudud
14.00-15.00 fotbollspass 2

**Isdiiwaangalinta**
Carruurta ayaa iyagu maalin kasta dooranaaya inay ka qeyb qaataan iyo in kale, laakiin masuulku waa inuu ilmaha iyo isaga macluumaadkiisa xidhiidhka diiwaan galiyaa isaga oo soo maraaya www.skeneif.com.

FIIRO GAAR AH- waa muhiim inaad ku buuxisaan macluumaadka lambarka shakhsiga ilmaha oo buuxaHaddii ilmahu aanu wali helin afartiisa lambar, sax godkaas xilliga diiwaan galinta.Waxa sidoo kale meesha jiri doona foomam diiwaangelineed oo loogu talagalay ka qeybgaleyaasha aan horay isku diiwaangalin.

**Konrotoolid joogitaanka:** ***maalin kasta*** Vävarevallen Skene ku taala.
Kaddib marka ilme uu isdiiwaangaliyo, ayuu u baahan yahay inuu isagu/iyadu uu maalin kasta joogitaankiisa u sheego hoggaamiyaha dadka xaadirinaaya ee fadhiya bannaanka guriga naadiga ku yaal Vävarevallen. Aad ayey muhiim u tahay in kaqeybgalayaashu waqti wanaagsan yimaadaan oo ay isxaadiriyaan maalin kasta Waxa aanu cunto fudud u qorsheyneynaa kaliya kaqeybgalayaasha isqoray maalintaas.

**Xidhiidhka:** haddii aad dooneyso inaad ilmaha la xiriirto xilliga lagu guddo jiro kaamka xagaaga ayaad soo waceysaa telefoonka xafiiska Kene IF 0320-408 58.Haddii xafiiska aan cidi joogin ayuu toos telefoonku ugu dhacayaa masuulka qaabilsan.

**Hawo xun:** Soo booqo www.skeneif.com

**Cunto fudud:** Waxa aanu maalin kasta ka qeybgalayaasha siineynaa cunto fudud. Feejignaan - wixii xasaasiyad cuntada ah waa in la sheegaa xilliga kantaroolida.

**Ammaanka ee ay tahay inuu qof kastaa raaco**
- Waxa dharka lagu soo bedelanayaa guriga.
- Dhamaan qof kastaa waa inuu soo qaato dhaladiisa biyaha.
- Haddii aad xanuunsaneyso guriga ayaa la joogayaa ilaa laba maalmood la caafimaad qabay.

**Hab dhaqanka:** waa muhiim inaad xataa idinka waaliddiinta ahi aad sidoo kale ilmahiina kala hadashaan in saaxiib wanaagsan la ahaado iyo inaan kaamka xagaaga uusan u dulqaadan doonin nooc kasta oo ka baxsanaan/faquuqid ah. Dhammaan carruurtu waa loo oggolaan doonaa inay ka qeybqaataan haddii ay hore ugu lahaayeen khibrad isboortiga iyo haddii kaleba. Kaamku waa inay ka dhex muuqato saaxiibtinimo iyadoo ay taasina tahay wax aad u muhiim ah. Hoggaamiyayaashu waxay si gaar ah uga fiirsanayaan inaan ilmena dareemin faquuqid/inaanu ka tirsaneyn. Hadafka kaamku waa in dhamaan carruurtu ay raaxaystaan/baashaalaan iyaga oo isla markaana dhaqdhaqaaq sameynaaya.

**GDPR – Xeerarka Ilaalinta Xogta**

Sawir qaadista iyo  - macluumaadka ka qeybgalayaasha, waxa loola jeedaa sawirada & filimada laga yaabo in kaamka xagaaga laga qaado, ayaa loo adeegsan karaa ujeedo suuqgeyn ahaaneed oo bogga internedka iyo warbaahinta bulshada la soo galiyo si dadka loogu wargaliyo kaamka xagaaga.Haddii aad su'aalo qabtid ama aad wax diidan tahay fadlan la xiriir Skene IF telefoonka xafiiska. 0320-408 58, kansliet@skeneif.com

**Bilaabeyso kubbadda cagta:** haddii ilmahaagu xiiseeyo inuu bilaabo kubbadda cagta ka dib xagaaga, wac 0320-408 58 ama u dir l kansliet@skeneif.com markaas ayaanu kuu gudbin doonnaa hoggaamiyaha dhallinyarada ee ku haboon. Ilmuhu waa inuu marka hore dhowr jeer yimaado oo uu kooxda dhowr jeer tijaabinaya/isku day ka hor inta uusan dooran inuu xubin ka noqdo. Waxaad warbixin iyo macluumadka lagala xiriiraayo hogaamiyaasheena iyo kooxaha carruurta- & dhalinyartataada ka heli doontaa www.skeneif.com.

**Maxaanu tan u samenaynaa?**

Fasaxa xagaagu waa mid dheer, 68 maalmood, waa in ka badan laba bilood inta uu ilmahu waxqabanaayo aan aheyn hawlihii caadiga ahaa ee dugsiga. Urruro badan ayaa xilliga xagaaga intiisa badan joojiya waxqabadyadooda caadiga ah carruurta- & dhalinyartataada. Hadday waalidku shaqeynaayaan oo aysan guriga joogin saaxiibo lala ciyaaro, ayaa ilmahau badanaa noqdaa qaar aan waxba qaban oo caajis badan, waxa laga yaabaa inay waqti ku lumiyaan ciyaaraha kombuyuutarka iyo waxyaalo la mid ah. Waxa jira carruur aan wax fursad ah oo ay fasax ama kaam lacag laga dhiibaayo/iska qaadaayo ku aadaan.

Skene IF waxay rabtaa inay carruurta siiso xagaa waxtar leh oo ay joogaan saaxiibo halkaas oo qof kasta lagu soo dhaweyn doono iyada oo aan loo eegeynin jinsiga, asalka qowmiyadeed iyo xaaladaha dhaqaale toona. Waxa aanu rabnaa in carruurtu ay kor u qaadaan isfahamka dhexdooda iyada oo loo soo maraayo isboorti oo ay saaxiibo cusub helaan. Dhaqaalaha qoysku waa in aanu xakameynin inuu ilmahau leeyahay fursad uu kaga qeyb qaadanaayo kaamka xagaaga. Dhamaan carruurta rabtaa waa inay ka qeyb qaadan kartaa. Waxa aanu rajeyneynaa in caruurta qaar ka mid ah ay xiiseyn doonaan isboortiga oo ay xubin ka qodnaan deyrta. Isboortiga kooxahu waxa uu ilmaha siiyaa wax aad u fiican iyaga oo heli kara saaxiibo nololsha oo dhan wada jooga. Waxqabadyada jidhka ee qeybta hore ee nolosha ilmaha ayaa aad muhiim u ah iyadoo la rajeynaayo inay u horseedi doonto isboorti la sameeyo nolosha oo dhan.

Si diiran xagaaga ugu soo dhawow Vävarevallen!

**Skene IF**

Aad ayay u mahadsan yihiin tabarucayaasha kaamka xagaaga:
Marks kommun, Marks Bostads AB, Markbladet.